

**Puntland Non-State
Actors' Association**



**Dallada Daneeyayaasha aan
Dawlga Ahayn ee Puntland**

Baaq Nabadeed

Taariikh: 9 December, 2019

Dalladda Bulshada Rayidka ah ee Puntland (PUNSAA) waxa ay walaac ka muujineysaa dagaalka ka socda deegaanka Af-barwaaqo iyo Towfiiq ee gobolka Mudug una dhexeeya beelaha walaalaha ah ee ku wada nool deegaankaas waxayna ku baaqaysaa in dagaalka loo joojiyo sida ugu dhaqsaha badan loona furo wadahadal laguna dhameeyo khilaafaadka.

Colaadda ka socota deegaankaasi waxa ay dhaawac u gaysatay shacabka aan waxba galabsan ee ku nool deegaanadaasi, waxay keentay barakac balaaran, dhaqaale burbur xooggan, iyo adeegyadii bulshada oo istaagay.

Sidaas darteed waxay mar labaad Dalladda PUNSAA ku baaqaysaa:

- In xabbadda laga joojiyo bulshada oo barakaca iyo burburka dhaqaale laga dhowro;
- In la furo wadahadal lagu furdaamiyo khilaafaadka iyadoo saldhig looga dhigayo in ay ka qaybgalaan dadka ay taladu ka go'do ee labada dhinac.
- in la baaro sababaha ay colaadani u soo laalaabanayso
- in la joojiyo hadalada xanafta leh ee colaadda sii hurinaya ee saxaafadda la isu marinayo.
- In Ummadda Soomaaliyeed aaney cid kale ka sugin danteeda in ay u fuliso ee iyaga looga baahan yahay in xaliyaan dhibtooda;
- In dadweynaha iyo Dawladaha Puntland iyo Galmudug ay ogaadaan in ay yihiin deris aan sina u kala maarmin oo u baahan in ay isku bahaystaan ilaalinta amingooda gaar ahaan iyo guud ahaan Soomaaliya.
- PUNSAA waxa ay madaxda labada Dawladdood ee Puntland iyo Galmudug ugu baaqaysaa in ay ka wada shaqeeyaan maslaxadda bulshadooda oo ay daawo u helaan khilaafaadkan soo noqnoqonaya.

Faysal Axmed Warsame

Guddoomiyaha Bulshada Rayidka ah ee PUNSAA

